



The Transitional Federal Government of the Somali Republic
Office of the Prime Minister

Ref: XRW/War-Saxaafadeed.019/08/11

Date: 04 August 2011

Ra'iisul Wasaaraha oo xafiiska ku qaabilay wafdi ka socday Qatar Charity

Muqdisho 4 August 2011

Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Dr Cabdiweli Maxamed Cali Gaas ayaa maanta xafiiskiisa ku qaabilay wafdi ka socday Hay'ada Qatar Charity International oo ah hay'adii ugu horreysay ee caalami ah ee soo gaartay shacabka barakacayaasha ee magaalada Muqdisho. Wafidgan oo ay ka mid ahaayeen Mohamed Ader-deor, Agaasimaha Gurmadka Deg-degga ah, Ali Mubarak Al-Kubaisi ahna Madaxa qeypta xiriirka deeqbixiyeasha, iyo Mohamed Hashim Omar oo ah Madaxa Mashaariicda Soomaaliya. Waxaa kaloo kulankan muhiimka ah joogey Guddoomiyaha Gobolka Banadir ahna Duqa magaalada Muqdisho Mudane Mohamud Ahmed Nur (Tarzan).

Ra'iisul Wasaaraha ayaa u mahadceliyey wafidga Qatar Charity imaatinkooda Muqdisho iyo sidii ay sida ugu dhaqsiyaha badan ugu soo gurmadeen shacabka soomaaliyeed. Wafidga ayaa iyagana uga mahadceliyey Ra'iisul Wasaaraha sidii quruxda badneyd ee loo soo dhoweeyey iyo waqtigisa qaaliga ah ee kulankii maanta. Wafidga ayaa warbixin kooban siiyey Ra'iisul Wasaaraha ee la xiriira kaalinta Qatar Charity iyo kaalmada ay soo gaarsiyyeen shacabka soomaaliyeed. Wafidgu waxey sheegeen inay aad ugu faraxsanyihiin inay soo gaaraan shacabka soomaaliyeed oo ay gar-gaar iyo gurmadba la soo gaaraan, waxeyna sheegeen inay qorsheynayaan inay sii kordhiyaan mucaaawanadooda. Wafidga ayaa sidoo kale sheegay inay qorsheynayaan inay mashaariic kale ka fuliyaan waddanka Soomaaliya sida mashaariic waxbarasho, kuwo caafimaad iyo kuwa shaqo loogu abuurayo dhalinyarada Soomaaliyeed.

Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Dr Abdiweli Mohamed Ali ayaa ka cadsaday in Qatar Charity ay wada gaaraan dhammaan shacabka soomaaliyeed iyo gobolada dalka oo ay macluul tii ugu xumeyd muddo 60 sano ah ka jirto. Waxuuna ka cadsaday inay kaalin mug leh ay ka qaataan dadaalada loogu gurmanayo shacabka tabaaleysan.

- DHAMAAD -